



Amniga Cuntada ee Adeegyada Ugeynta iyo Ka Soo Qaadashada

Cuntada kulul ku hay kuleylkeeda cuntada qabowna qabowgeeda

Kala gaar u dhig cuntada kulul iyo ta qabow marka loo diyaariyo in meel la geeyo ama loo imanayo in la qaato si aysan saamayn ugu yeelan aagga khatarta heerkulku. Aagga khatarta heerkulka waa inta u dhexaysa 41°F iyo 135°F.

- Ku hay cuntada qabow 41°F ama in ka hooseysa.
- Ku hay cuntada kulayl 135°F ama in ka sarreysa.
- Had iyo jeer isticmaal heerkulbeeg si aad u hubiso heerkulka cuntada.

Isticmaal qaboojiye farsameed, qalab kuleyl ku hayn, ama weelal dahaaran marka aad cuntada ku hayso meelo diirimaadkooda ama qabowga loogu hayo.

- Qalabka iyo weelasha adeegsiga badan leh waa inay qanciyaan Shuruudaha Qalabka xeerka cuntada ee Minnesota. (<https://www.health.state.mn.us/communities/environment/food/docs/fs/equipreqfs.pdf>) (PDF).
- Sheyada hal-adeegga iyo hal-isticmaalka ahi wa inay badbaado iyo nadaafad lahaadaan. Kuwan waxa ka mid ah sheyada ay ka midka yihiin maacuunta, koleyada, weelalka, ama waxyaabha lagu duubo. Xeerar kale ayaa walibana jiri kara.
- Si adag u xir ama u awd waxyaabha cuntada ah ee loo diyaariyay soo qaadashada ama u geynta si looga badbaadiyo farafaraynta.
- Qorshee diyaarinta dalabka iyo u geynta si loo yareeyo dhererka wakhtiga cuntadu ay ka baxeeyo ku haynta heerkulkeeda.

La xiriir arrimo baarahaaga (inspector) haddii aad su'aal qabto.

Habdhaqannada ugu fiican ee cunto u geynta

- Ilaali dalabyada cuntada markay kaydinta, baakaynta, iyo gaadiidka heerkooda ku jiraan si looga hortago isku kala-gudubka faddaraynta iyo faddaraynta buska iyo cayayaanka ama ilo kaleba. Qalabka iyo gawaarida nadaafadda ugu dadaal.
- Dhex dhig hilibka aan bislayn, khudaarta iyo cagaarka aan baakadaysan, iyo cuntada diyaarka u ah in la cuno baakado ugu geyn gaar ah si looga hortago isku kala-gudubka faddaraynta.

Habdhaqannada ugu fiican ee qaadashada cuntada

- Yaree wakhtiga cuntada kulul iyo kuwa qabow lagu hayo weelalka aan farsamaysnayn.
- Duub ama dabool waxyaabaha cuntada ah gebi ahaanba si aad uga ilaalisoo cuntada faddarowga intaad la sugayso qaadashada.